

## **Nidaamka Cusub ee Xuquuqda Aadamiga ee Ontario**

Nidaamka Cusub ee Xuquuqda Aadamiga ee Ontario wuxuu hirgelay 30ka Juun, 2008. Sida waafaqsan sharciga cusub ee Xuquuqda Aadamiga, qof kasta oo la kulma fal takoorid ah waxuu dacwadiisa toos ugu gudbin karaa Maxkammada Xuquuqda Aadamiga Ontario. Laga bilaabo 30ka Juun, 2008, dhamaan arjiyada cusub oo la xiriira xuquuqda aadamiga waa in lagu soo hagaajiyaa Maxkadda oo aan loo gudbin Guddiga Xuquuqda Aadamiga Ontario. Xarunta cusub ee qaabilsan talobixinta sharciyeed, waxey gargaar u fidineysaa qof kasta oo la kulma fal xaqiraad ah oo kasoo horjeeda Sharciga Xuquuqda Aadamiga.

---

### **Xarunta Dhexe oo Sharuucda ee Xuquuqda Aadamiga**

Xarunta Dhexe oo Sharuucda ee Xuquuqda Aadamiga waxey siineysaa talooyin sharciyeed dadka ku nool Ontario oo la kulmay fal xaqirrad ah oo qilaafsan Xuquuqda Aadamiga Ontario oo raba iney dacwadooda u gudbiyaan Maxkadda Xuquuqda Aadamiga Ontario.

### **Sidee Gargaar uga heli karaa Xarunta Gargaarka Sharuucda ee Xuquuqda Aadamiga?**

Haddii aad la kullanto fal xaqiraad ama takoorid ah una baahan tahay talooyin sharciyeed si aad arjiga dacwad ugu gudbiso Maxkamadda Xuquuqda Aadamiga Ontario, ama aad rabto inaad xalliso arrin xaqiraad ah oo kasoo horjeeda Sharciga Xuquuqda Aadamiga, lasoo xiriir Xarunta Sharciyada.

Human Rights Legal Support Centre  
400 University Avenue, 7th Floor  
Toronto, Ontario M7A 1X8  
Telefoon Magaalada Gudaheeda: (416) 314-6266  
Telefoon Dibadda oo Bilaa Lacag ah: 1-866—625-5179  
Telefoon Magalada Gudaheeda: (416) 314-6651  
Taar Magalada Gudaheeda oo Bilaa Lacag ah: 1-866 612-8627  
[www.hrlsc.on.ca](http://www.hrlsc.on.ca)

Haddii aad dooneyso inaad kullan wareysi ah la yeelato xafiiska, usoo dir telefoon lambarka kor ku xusan. Haddii aad deggan tahay dibadda magaaloweynta Toronto (GTA), nala soo xiriir; waxaan ka wada hadleynaa sidii aan baahidaada u haqab tiri laheyn. Waxaan ku dadaaleynaa in adeegga aad u baahan tahay isla xaafadaada kuugu soo gaarsiino. Waxaan adeegyadeena ku bixi kareynaa wax ka badan 140 luqadood.

---

### **Guddiga Xuquuqda Aadamiga Ontario**

Guddiga Xuquuqda Aadamiga Ontario waxuu ka shaqeeyaa hormarinta iyo badbaadinta xuquuqda aadamiga. Xilkeena ugu weyn waa xallinta sababaha aasaasiga oo dhaliya dad-takoorista. Lasoo xiriir Guddiga haddii aad dooneyso inaad xogogaal u noqoto arrimaha xuquuqda aadamiga Ontario, ama aad jeceshahay inaad nagala shaqeyso xagga xiriirka bulshada iyo waxbarashda arrimaha takoorista.

### **Maxaan qaban karaa haddii dacwadeyda xuquuda aadamiga uu hayo Guddiga?**

Haddii dacwadaada soo gudbisay 30ka Juun, 2008 ka hor, teleefoon u dir xafiiska Guddiga.

Ontario Human Rights Commission  
180 Dundas Street W., 7th Floor  
Toronto, ON M7A 2R9  
Telefoon Magalada Gudaheeda: (416) 326-9511  
Telefoon Dibadda oo Bilaa Lacag ah (1-800-387-9080  
Taar Magalada Gudaheeda: (416) 314-6526  
Taar Dibadda oo Bilaa Lacag ah : 1-800-308-5561  
[www.ohrc.on.ca](http://www.ohrc.on.ca)

## Maxkamadda Xuquuqda Aadamiga Ontario

Maxkamadda Xuquuqda Aadamiga Ontario waxey ka shaqeysaa dacwooyinka takooridda ee lagu soo oogay Shuruucda Xuquuqda Aadamiga Ontario. Maxkamaddu waxey dacwooyinka ku xallisaa qaab dhexdhexaadin ama qaab gar-naq ah. Lasoo xiriir Maxkamadda haddaad u baahato arrimaha la xiriira

- Arjiyada oogista dacwooyinka takoorista
- Buuxbuuxinta arjiga ku saabsan dacwooyinka takoorista
- Xogsiinta qaabka loo xereeyo arjiga ku saabsan dacwooyinka takoorista
- Xaladda arji takooris ood horay ugu soo gudbisay Maxkamadda

Human Rights Tribunal of Ontario

655 Bay Street, 14th floor

Toronto, ON M7A 2A3

Telefoon Magalada Gudaheeda : (416) 326-1312

Telefoon Dibadda oo Bilaa Lacag ah: 1-866-598-0322

Taar Magalada Gudaheeda: (416) 326-2027

Telefoon Dibadda oo Bilaa Lacag ah: 1-866-607-1240

Taar Magalada Gudaheeda: (416) 326-2199

Taar Dibadda oo Bilaa Lacag ah: 1-866-355-6099

[www.hrto.ca](http://www.hrto.ca)

## Shuruucda Xuquuqda Aadamiga Ontario

*Maxkamadda Xuquuqda Aadamiga Ontario waxey ka shaqeysaa dacwooyinka takooridda oo la xiriira:*

- Shaqaaleynta
- Guriyeenta
- Qandaraasyada
- Adeegyada, Badeecyada iyo Goobaha
- Urur shaqaale iyo ururrada xirfadlayaasha

## Waa maxay takoorid?

Takooris waa marka qofka si xaqirid ah lagula dhaqmo, siiba xaxiridu ay la xiriirto sababaha hoos ku xusan:

- Jinsiyadiisa ama midibkiisa
- Dhalashadiisa hore (Ancestry)
- Meesha Asal ahaan ka yimid
- Muwaadinimadiisa
- Qolada kasoo jeedo
- Diintiisa
- Haddii qaato gargaarka bulshada (siiba guryaha)
- Dooqa galmada qofka (Sexual orientation)
- Doob ama Xaasle
- Heerka Dhaqaalaha Qoyska
- Haddi horay dembi u galay (Xagga Shaqaleyn keliya, waa in cafis helay)
- Qofka Cimrigiisa
- Curyaanimadiisa
- Jaadka jinsiga Qofka (labood ama dheddig ama xaamilanimo )

Dhaqannada fal takooris ama kalasoocid waxaa ka mid ah:

Marka qofka loo diido xuquuq uu lahaan kari lahaa, ama loo diido fursad, iyo/ama lagu kallifo inuu qabto howlo kale oo uusan mudneyn iyadoo lagu xigleynayo astaamaha kor lagu soo xusay.

Fal takoorisku wuxuu u dhici karaa si' kama siiba marka maamulka shaqada, milkiilaha guriga, ama adeeg bixiyahu uusan wax ujeeddo ah ka laheyn. Mathalan, waxaa fal takooris ama xaqiris ka mid noqon kara haddii maamulka shaqada, milkiilaha guriga, ama adeeg bixiyahu uusan tixgelinin baahida gaarka ah ee shaqaalaha, ijaartaha ama macaamishiisa, siiba marka baahidaasi ay ku sifoobi kareyso astaamaha *Sharciga* ku xusan.

Mithaalo Fal- takooris ama xaqiraad ah: Haddii adigoo baadigoobaya guri ijaar ah uu milkiilaha ku yiraahdo "Maya, halkan caruur uma oggolin."

Haddii adigoo meel u jooga wareysi shaqo-qoris ah uu maamulka sharikada kugu yiraa "Kuma qori kareyno haddii aad xaamilo tahay ama aad ku fekerayso inaad uur yeelato." Haddii adigoo jooga goob shaqo ah uu maamulahaada kugu yiraa "Waan jeclaan laheyn inaan ku dallacsiino, laakinse macaamishiisa ma jecla iney la xiriiraan qof xijaab xiran" ama "Waan ku ruqseyneynaa, maxaa yeelay dhaawacaada kuuma suuragelinaayo inaad fuliso howshii lagu qoray."

